

Aberta waxay kordhinaysa dadka u qalma tallaalka monkeypox

Luulyo 28, 2022 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Laga bilaabo Luulyo 28, dadka ree Alberta ee 18 jirada ah ama kasii weyn kuwaas oo isku arka in ay buuxiyeen shuruudaha u qalmidda ee kahortagga loo danleeyahay kahor inta aysan khattar u galin ayaa qaadan kara tallaalka monkeypox.

Imvamune (tallaalka smallpox iyo monkeypox) waxaa Canada looga ogolaaday dadka waaweyn ee 18 sano jirada ah ama kasii weyn kuwaas oona loo tixgalinayo in ay khattar badan ugu jiraan fayraska. Alberta waxay Imvamune siinaysay dadka kulanka dhow la yeeshay qof la xaqiijiyay inuu hayo monkeypox kaddib marka ay khatar u galaan ilaa Juun 7. Si ay gacan uga gaysato wax ka qabashada faafitaanka fayraska, Alberta waxay kordhinaysaa dadka uqalma tallaalka monkeypox si loogu daro kahortagga la bartilmaameedsanayo kahor inta aanay khattar ugelin dadka reer Alberta ee khattarta badan ugu jira in ay khattar u galaan monkeypox.

Laga bilaabo Luulyo 28, balamaha tallaalka monkeypox waa lasii qabsan karaa, ayada bixinta tallaalku bilaabmi doono Luulyo 29.

Helitaanka tallaaku wakhti xaadirkaan waa mid kooban. Tallaalka monkeypox waxaa loo diyaarin doonaa shakhsiyadka u qalma, ayada oo laga bilaabay Edmonton iyo Calgary halkaasoo ah meesha ilaa hadda xaaladaha la hubiyay lagu hayo. Tallaal dheeraad ah ayaa la heli doonaa todobaadyada soo socda, tallaalkana waxaa lagu diyaarin doonaa oo laga heli doonaa xarumaha kale ee Alberta.

U qalmidda tallaalka

Laga bilaabo Luulyo 28, dadka deggen Alberta ee 18 sano jirka ah ama kasii weyn ee u qalma tallaalka monkeypox waxaa kamid noqon doona:

- Dadka jinsi ahaan isbadala, bulshada jinsiga ay ku dhasheen ama shakhsiyaadka dadka soojireenka ah ee two-spirit kuwaas oo isku tilmaama in ay uhiin ragga u galmooda ragga kale, labeeb iyo ragga kale ee galmada la sameeya ragga (gbMSM) kuwaasoo buuxiya ugu yaraan mid kamid ah shuruudaha soo socda:
 - In ay mareen dhawaan (lixdii bilood ee ugu danbaysay) baaritaanka caabuqa galmada lagu gudbiyo.
 - Qorshaynaya in ay sameeyaan, ama sameeyay 90 maalmood ee la soo dhaafay, galmo ka baxsan xiriir hal qof ku eg.
 - Bookhday goobaha xiriirka galmada 90kii maalmood ee lasoo dhaafay (sida, meelaha lagu raaxaysto, kulamada galmada) ama qorshaynaya, ama ka shaqeeya/ku tabaruca goobahaan.
- Xiriir galmo ee kasta ee qofka kor ku qeexan.
- Shaqaalaha iyo mutadawiciinta goobaha bulshada ama dhacdada halkaasoo howsha galmada u dhexaysa ragga (dadka kor ku qeexan) ay ka dhici karto.

Difaaca ka dhanka ah fayraska monkeypox

Kulanka dhow ee dadka looga shakiyay ama la hubiyay in ay qabaan caabuqa monkeypox waxaa lagula talinayaa in ay iska eegaan calaamadaha muddo 21 maalmood ah kadib marka ay khattarta ugalaan. Haddii astaamuhu soo if baxaan, waa in ay iskaliyeelaan, daryeel raadsadaan oo isbaaraan.

Sii qabsashada ballanta tallaalka

Ayada oo ay sabab u tahay helitaanka tallaalka oo kooban, qof kasta oo u qalma wakhtigaan oo danaynaya in uu qaato tallaalka monkeypox waa in uu waco Health Link isagoo ka wacaya 1-866-301-2668 si dib loogu eego u qalmidda una sii qabsado ballanta.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan monkeypox, bookho alberta.ca/monkeypox.

Macluumaadka la xariira

- [Fayraska monkeypox](#)

Waydiimaha warbaahinta

Mark Feldbusch

780-915-7722

A/Press Secretary, Alberta Health

[Ka eeg shaacintaan onleenka](#)
[Qolka wararka Dowladda Alberta](#)
[La xiriiir dowladda](#)
[Iska xir](#)